



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 24/08/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 138

**XEERKA: QARAARKA XOOJINTA U-HOGAANSANAANTA SHARCIYADA IYO
XEERARKA DAKHLIGA**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;



Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} farqadaha (a), (b) & (e) iyo Qodobka 100^{aad} Farqadaha (a) & (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee KMG ah;

Markuu arkay: Warbixinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee ku saabsan caqabadaha kala duwan ee saameynaya ururinta dakhliga Dawladda, oo ay ku jiraan noocyada kala duwan ee canshuuraha;

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW0044.08.23 ee 24/08/2023 kuna saabsan ansixinta Qaraarka Xoojinta U-hogaansanaanta Sharciyada iyo Xeerarka Dakhliga, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey;

Markuu garwaaqsaday: Baahida degdegga ah ee loo qabo dardargelinta iyo kobcinta dakhliga gudaha si loo gaaro isku filnaansho Maaliyadeed;

Wuxuu Xeeriyay:

Qodobka 1^{aad}
Go'aanka Golle


Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW0044.08.23 ee 24/08/2023, kuna saabsan ansixinta Qaraarka Xoojinta U-hogaansanaanta Sharciyada iyo Xeerarka Dakhliga, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2^{aad}
Qaadashada Shahaadada Canshuur Bixinta

1. Golaha Wasiirrada XFS waxay bogaadinayaan shacabka Soomaaliyeed ee canshuur bixiyaha ah oo laf-dhabar u ah Dawlad dhiska. Xilligan xasaasiga ah ee lagu jiro dib udhiska dhaqaalaha dalka iyo la dagaallanka iyo cirib tirka khawaarijta, waxa lagama maarmaan ah in la dardargeliyo dedaalada dakhli ururinta si loo bixiyo adeegyada aas-aasiga ah ee muwaadiniinta Soomaaliyeed ka sugayaan Dawladda.
2. Dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda ee bixiya adeegyada Dawliga ah sida shatiyada, qandarayaasyada, cashuurta adeegyada la talinta (consulting and professional fees), waxa la farayaa in ay ku xiraan shahaadada canshuur bixinta (SHCN/TCC) shirkadaha iyo hay'adaha loo fidinayo adeegyada Dawliga ah.
3. Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladdu waa in ay hubiyaan bixinta cashuurta ku waajibtay khabarada iyo lataliyaasha la shaqeeya ee ay musharkooda bixiyaan Hay'adaha Caalamiga, kaas oo aan soomarin Khasnada Dhexe ee Midaysan ee Dawladda.
4. Dhammaan hay'adaha Dawladda ee bixiya shatiyada iyo ruqsadaha noocyadooda kala duwan waxa la farayaa in ay fududeeyaan xogta ay Wasaaradda Maaliyaddu uga baahan tahay si looga dhigo hab dhigitaal ah kuna xiran Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) marka ay bixinayaan shatiyada iyo ruqsadaha.

Qodobka 3^{aad}
Dhaqangalka

Dhammaan hay'adaha Dawladdu waa in ay xaqiijiyaan dhaqalgalkinta Qaraarkan muddo 30 maalmood gudahood ah.


Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda XFS

